



Xuquuqda Shaqaalaha

Hoos Yimaad Xeerka Xiriiriyada Shaqaalaha Qaranka

Xeerka Xiriiriyada Shaqaalaha Qaranka (NLRA) ayaa dammaanad ka qaadaysa xuquuqda shaqaalaha inay urur yeeshaan oo si wadajir ah ula gorgortamaan loo-shaqeeyahooda, oo ku kacaan waxqabad kale oo dhowran oo wadajir ah ama iska daayaan mid kasta oo ka mid ah ficilladaas korka ku yaal. Shaqaalaha hoos yimaad NLRA* ayaa laga ilaaliyaa noocaca anshax xumada loo-shaqeeyaha iyo ururrada shaqaalaha qaarkood. Ogeysiiskan ayaa adiga kaa siinaya macluumaad guud arrimaha ku saabsan xuquuqdaada, iyo xilalka saaran loo-shaqeeyayaasha iyo ururrada shaqaalaha markay hoos timaad NLRA. La xiriir Guddiga Xiriiriyada Shaqada iyo Shaqaalaha Qaranka (NLRB), oo ah hay'adda federaaliga ah ee soo baarta ee xallisa cabashooyinka hoos yimaad NLRA, adiga oo isticmaalaya macluumaadka lagu bixiyay hoosta, haddii wax su'aalo ah aad ka qabto xuquuda qaarkood ee laga yaabo inay ku aaddan tahay goobtaada shaqo ee gaarka ah.

Markay hoos timaad NLRA, adigu waxaad xaq u leedahay:

- Inaad abaabusho urur shaqaale sidii aad ugala xaajooto loo-shaqeeyahaaga arrimaha ku saabsan mushqaayadaha, saacadaha iyo shuruudaha iyo xaaladaha kale ee shaqada adiga kugu saabsan.
- Samayso, ka qaybgasho ama aad caawiso urur shaqaale.
- Ula gorgortamaan qandaraas si wadajir ah iyada oo loo marayo wakiillada shaqaalaha aad doorateen loo-shaqeeyahaaga dejinaya mushqaayadahiina, manfaciina saacadahiina iyo shuruudaha iyo xaaladaha kale ee shaqaynta.
- Inaad kala hadasho arrimaha ku saabsan mushqaayadahaaga iyo shuruudaha iyo xaaladaha kale ee shaqada ama abaabulka ururka shaqaalaha dadka aad la shaqeyso ama ururka shaqaalaha.
- Inaad ficil ka qaaddo hal ama in ka badan oo ah dadka aad la shaqeyso sidii aad ugu horumarin lahaydeen xaaladahiina shaqo, iyada oo ay weheliyaan siyaabo kale, in loola soo qaado cabashooyinka si toos ah loo-shaqeeyahaaga ama hay'ad dawladeed, iyo idinka oo ka raadsada caawimo ururka shaqaale.
- Inaad shaqo joojisaan iyo inaad bannaan joogsataan, iyada oo ku tiirsan ujeeddada iyo qaabka shaqo joojinta iyo bannaan joogsiga .
- Inaad doorato iska deynta ficilladaas, oo ay jiraan kaqaybgalka ama ku jiritaanka ahaan xubin uru shaqaale.

Markay hoos timaad NLRA, waa sharci-darro inuu loo-shaqeeyahaagu:

- Adiga kaa mamnuuco inaad ka hadasho ama wax u raadiso ururka shaqaalaha wakhtiga aan shaqada lagu jirin, ee ay ka midka yihiin kahor ama waxa ka dambeeya shaqada, wakhtiyada nasasha lagu jiro; ama in inaad qaybiso qoraallada ururka wakhtiga aan shaqada lagu jirin, ee aan ahayn goobaha shaqada laga qabto, ee ay ka midka yihiin xerooyinka baabuurta la dhigto ama qolaalka nasashada.
- Inay adiga kaaga su'aalaan arrimaha ku saabsan taageerada ama ficillada ururkaaga hab adiga kaaga niyad-jabiya inaad ka ka qaybgasho waxqabadka.
- Adiga shaqada kaaga eryo, hoos lagu darajeeyo, ama saacadaha lagaa naaquso ama gallinka (shift) shaqada lagaa beddelo, ama sida kaleba ficil lid ah laguugu qaado adiga, ama laguugu hanjabo in laguugu qaaddo ficilladan midkoodna, sababta oo ah adiga oo ka qayb noqday ama taageeray urur shaqaale, ama sababta oo ah idinka oo si wadajir ah u qaaday ficil loogu talagay is-gacanqabad iyo is-ilaalin, ama sababta oo ah adiga oo doorta inaad ka qaybgalin ficilkan oo kale.
- Kuugu hanjabo inuu xiro meesha aad ka shaqeyso haddii ay shaqaaluhu doortaan inuu urur shaqaale wakiil ka noqdo iyaga.
- Inuu kuugu ballan qaado ama kugu dallacsiiyo, lacag bixinta kuugu kordhiyo ama manfac kale kugu siiyo si kuugu dhiirrigaliyo ama kuugu niyad-jabiyo taageerada ururka shaqaalaha.
- Inuu kaa mamnuuco ku gashiga koofiyadaha, badhannada, t-shirt-yada iyo biinasha ururka shaqaalaha marka la joogo goobta shaqada laga reebo duruufo gaar ah hoostooda mooyee.

- Inuu basaaso ama fiidiyo ka qaado waxqabyada iyo isku imaadyada ururka shaqaalaha ee nabadda ah ama inuu iska yeel-yeelo inuu sidaan ku kacayo.

Markay hoos timaad NLRA, waa u sharci-darro inuu urur shaqaale ama ururka shaqaale ee adiga kaaga wikiilka kaaga ah la gorgortanka loo-shaqeeyahaagu inay:

- Adiga kuu hanjabaan ama ku qasbaan si ay taageero ugu helaan ururka.
- Adiga kuu diidaan inay qaabsocodsiiyaan cabashada sababta oo ah adiga oo dhaliilay saraakiisha ururka ama sababta oo ah adiga oo aan ahayn xubin ruru.
- Isticmaalaan ama lahaadaan heerar ama hab-dhaqanno kala-takoo ku leh shaqo u dirka goobta shaqada laga qoro.
- Sababaan ama isku dayaan u horseed loo-shaqeeye inuu kala-qoqob kugu sameeyo adiga sababta oo ah awgeed waxqabadkaaga ururka la xiriira.
- Ficiil daran adiga kaaga qaadaan sababta oo ah adiga oo aan kaqaybgalin ama taageerin ururka shaqaalaha.

Haddii adiga iyo dadka aad wada shaqeysaani xushaan urur shaqaale inuu noqdo noqodo wakiil u gorgortan wadajir ahaan, loo shaqeeyahaaga iyo ururka ayaa loo baahan yahay inay u gorgortamaan si daacad ah oo dadaal dhab ah leh sidii loo gaari lahaa heshiis qoran oo dhinac kasta qabanaya dejineysana qodobbadaada shuruudahaaga shaqo. Ururka shaqaale ayaa looga baahan yahay inay cadaalad leh wakiil kaaga noqdaan markay kuugorgortamayaan iyo markay meel-marinayaan heshiiska.

Anshaxa sharci-darrada ah lama oggola. Haddi aad aaminsan tahay in xuquuqdaada ama xuquuqda kuwa kale lagu xadgudbbay, waa inaad ula xiriirtaa NLRB si dhakhso leh sidii aad u ilaalin lahayd xuquuqdaada, guud ahaan gudahooda lixdii bilood ee ay ficilkii sharci-darradu dhacday. Waxaad ka warsan kartaa arrimaha ku saabsan xadgudubyada suurtagalka ah loo-shaqeeyahaaga ama qof kasta oo loo wargalinayo warsiga. Dacwad ayuu qof kastaa xereyn karaa oo looma baahna kaliya inuu qofka shaqaalaha ah ee xadgudubku sida tooska ahi u saameeyo inuu xereeyo. NLRB ayaa ku amri karta shaqaalaha inay dib u shaqaaleyso shaqaale laga eryay shaqada iyada oo ku xadgudubtay sharciga oo la siiyo lacag bixinta iyo manfaca ka lumay, oo waxa laga yaabaa inay ku amarto shaqaalaha ama ururka shaqaalaha inuu ka waantoobo ku-xadgudubka sharciga. Shaqaaluhu waa inay ka raadsadaan caawimo xafiiska dagmeed ee NLRB ee ugu dhow, oo laga heli karo barta internetka ee Hay'adda. <http://www.nlrb.gov>.

Waxa kale oo la xiriiri kartaa NLRB adiga oo uga waxa taleefanka bilaashka ee: **1-866-667-NLRB (6572)** ama (TTY) **1-866-315-NLRB (1-866-315-6572)** looguna talagaly dadka dhagaha wax ka-qaba.

If you do not speak or understand English well, you may obtain a translation of this notice from the NLRB's Web site or by calling the toll-free numbers listed above.

*Xeerka Xiriiriyada Shaqaalaha Qaranka ayaa hoos yimaad inta ugu badan ee ah loo-shaqeeyayaasha gaarka loo leeyahay. Waxa hoos imaadka NLRA ka reebban shaqaalaha dhinaca-dowladda, shaqaalaha beeraha iyo guryaha, qandaraaslayaasha madaxa bannaan, shaqaalaha ay shaqaaleeyaan waalidu ama seyga/afada, shaqaalaha diyaaradaha iyo tareennada ee hoos yimaad Xeerka Shaqada Jidadka-Tareenka, iyo kormeerayaasha (in kasta oo kormeerayaasha lagu takooro iyaga oo diida inay ku xadgudbaan NLRA ay hoos iman karaan xeerka).

Kani waa Ogeysiis Dowladeed oo Rasmi ah oo ma aha inay cidina burburiso.